Tijaabada baarista xaaladda Down markii uur la leeyahay

Buug-yarahaan wuxuu kuu macneynayaa baaritaanyada la samayn karo xilliga uurka si lo ogaado haddii uu cunuggaaga qabo Xaaladda Down (waa xaalad caafimad-darro oo sababo koromosoom dheeraad ah). Haweenada uu maleeyo inay qabaan fursad wayn inay dhalaan cunug leh xaaladda Down waxay sameyen karaan tijaabo cudur-aqoonsi. Baaritaankaan waxaa lagu magacaaba amniocentesis. Waxaad xulan kartaa haddii aad rabtid in baaritaankaan lagugu sameyo iyo in kale.

Waa maxay Xaaladda Down?

Xaaladda Down waa xaalad ay hiddo-wadeyaasha ku lug-leeyihiin iyo sababo koromosoom dheeraad ah. Qof qaba Xaaladda Down wuxuu qabaa 47 koromosoom intii uu ka lahaan lahaa 46.

Xaaladda Down dadka ku dhaca si kala duwan ayuu uu wax-yeeleeya. Dhammaantooda waxay qabaan naafonimo wax-barasho. Kuwo qaarkooda kani khafiif ayuu ku yahay, kuwo kalena si xun ayuu u wax-yeeleeya. Badanaa waxay lahaan karaan nolol in yar caadi ah markii ay weynaadaan, qaar kale waxay u baahan yihiin taageero ka badan kuwa kale. Qaar waxaa xittaa ku dhaco xaalado caafimaad, sida dhibaato wadne. Badanaa xaaladahaan waa la daaweyn karaa.

Waa imisa fursadayda inaan dhalo cunug qaba xaaladda Down?

Xaaladda Down wuxuu dhacaa 1kiiba 500 uur. Caadi ahaan ma ahan wax ay qoysaska iska dhaxlaan. Dhammaan haweenada dunida ayaa dhali karo cunug qabo xaaladda Down. Fursada lagu dhalo wuu sii kordhaaya markii aad sii duqowdo laakin xittaa haweeno dhallinyaro ah ayaa dhali karo cunug qaba xaaladda Down. Sababtaan awgeeda, haweenada da' walba jiro ayaa la siiyaa baaritaanka ogaanshada.

Natiijada baaritaanka wuxuu kuu sheegi doonaa fursaddaada inaad uurkaan ku dhasho cunug qaba xaaladda Down.

Maxuu ii sheegi doonaa natiijada tijaabada baarista?

Waxaa jiro dhowr tijaabo baaris ee lagu ogaado xaaladda Down. Dhammaantoodana ma bixin karaan natiijo shaki la'aan ah in ilmaha uurkaaga ku jiro qabo xaaladda

Information for Women

© Public Health Wales

Down. Waxay kuu sheegi doonaan oo kaliya fursadda aad u qabtid inaad dhasho cunug leh xaaladda Down.

Tijaabada baarista laguma ogaan karo dhammaan carruurta qaba xaaladda Down. Qiyaas ahaan, 10 cunug ee qaba xaaladda Down, toddobo kaliya ayaaa lagu ogaadaa tijaabada baarista. Kani waxaa loola jeeda in 10kii carruur seddax lagu ogaan doonin inay qabaan xaaladda Down.

Miyeey tijaabada baarista xaaladda Down halis yahay?

Tijaabada baarista waa tijaabo dhiig oo fudud. Halista wuxuu la mid yahay halisyada kale ee dhiig-qaadka.

Waa maxay faa'idoyinka sameynta tijaabada baarista xaaladda Down?

Haddii uu cunuggaaga qabo Xaaladda Down, waxaad go'aansan kartaa haddii aad rabtid inaad sii wado uurka iyo inkale.

Waa maxay faa'ido-darrada sameynta tijaabada baarista xaaladda Down?

Sameynta baaritaanka wel-wel ayuu kugu dhalin karaa, gaar ahaan haddii aad hesho natiijo muujinaayo inaad qabtid fursad sare inaad dhasho cunug leh xaaladda Down. Fursadda sare waa markii ay natiijada u dhexeyso 1kiiba 2 iyo 1kiiba 150. Haddii natiijada u dhexeyso 1kiiba 2 iyo 1kiiba 150, waxaa lagu siin doonaa baaritaan kale si loo xaqiijiyo in ilmahaada qabo xaaladda Down. Inkastoo baaritaanka xaqiijinta uu sababi karo ilma-dhicis, haweeno badan kani dhibaato ayuu ku yahay. Haweno qaarkood waxay rajeeyaan inay tijaabada baarista sameynin sababto ah go'aan kaa gaarista ayaa mid dhib ah.

Miyaan sameeyaa baaritaanka xaaladda Down?

Adiga kaliya ayaa go'aan ka gaari karo haddii aad rabtid in baaritaanka lagugu sameeyo iyo inkale. Qaar ka mid ah haweenada waxay jecel yihiin inay ogaadaan haddii ilmahooda qabo xaalada Down, kuwo kalena ma rabaan inay ogadaan. Dhammaan isbitaalada ku yaalo Wales waxay haweenada siiyaan tijaabada dhiigga, laakin go'aanka haddii aad rabtid baaritaankaan iyo inkale adiga ayuu kugu xiran yahay. Waxaad kala hadli kartaa umulisadaada wixii aad rabtid inaad sameyso. Waa lagu taageeri doonaa wax walba aad go'aansato.

Information for Women
© Public Health Wales

Tijaabo baaris sidee ah ayaa la siin doonaa?

Waa in lagugu sameeyo skaanka dhawaaqa dheer ka hor intii tijaabada dhiigga lagugu sameynin. Tijaabada dhiigga waxaa la sameyn karaa laga bilaabo 15 toddobaad oo uur ah ilaa 18 toddobaad.

Gobolka Wales tijaaboyinkaan baarista laguguma samayn doono haddii mattaano ama ilmo ka badan uurka ku jiraan.

Tijaabada dhiigga caadi ahaan lama sameeyo 18 toddobaad oo uur ah ka dib. Haddii aad tahay in ka badan 18 toddobaad oo uur ah iyo rabtid in uurkaaga laga baaro xaaladda Down, waa inaad kani kala hadashaa umulisadaada ama takhtarka isbitaalkaaga.

Halkee ayaa baaritaanka lagu samayn doonaa?

Umulisadaada ayaa ku sheegi doonto meesha baaritaanka lagu samayn doono.

Natiijoyinka

Waxaad caadi ahaan natiijada tijaabadaada dhiigga heli doontaa labo toddobaad gudeheeda.

Natiijadeyda baaritaanka miyuu ahaan doonaa mid qarsoodi (sir) ah?

NHS'ta waxay natiijoyinka dhammaan baaritaanyada ku hayaan si qarsoodi ah. Siyaasadda isbitaalka ee ku saabsan inta qofood ee arki karo natiijoyinka baaritaanyadaada wuu kala duwan yahay. Umulisadaada ayaa kuu macneyn doonto hab-socodyada deegaankaaga.

Sidee uu heli doonaa natiijada tijaabadeyda dhiigga?

Umulisadaada ayaa kuu sheegi doonto goobta iyo sida aad u heli doonto natiijada tijaabadaada. Natiijada waxaa lagu sheegaa haddii aad qabtid 'fursad sare' ama 'fursad yar'.

Maxaa dhacaayo haddii natiijadeyda muujiyo in fursadeyda yar yahay?

Haddii natiijada uu muujiyo inaad qabtid fursad yar inaad dhasho cunug qaba xaaladda Down, baaritaanyo kale uma baahnid. Fadlan ogow in helidda natiijo fursad yar looga jeedin **inaadan** dhali doonin cunug qaba xaaladda Down.

Information for Women

© Public Health Wales

Maxaa dhacaayo haddii natiijadeyda muujiyo in fursadeyda u sarreeyo?

Haddii natiijada baaritaankaaga muujiyo inaad qabtid fursad sare inaad dhasho cunug qaba xaaladda Down (kaasi waa, fursad 1kiiba 2 iyo 1kiiba 150), waxaa ballan lagula samayn doonaa umulisadaada ama takhtarkaaga. Waxay kuu macneyn doonaan natiijoyinka baaritaankaaga, waxaana kala hadli kartaa haddii aad rabtid iyo in kale in lagugu sameeyo tijaabada cudur-aqoonsiga. Waxaad u baahan doontaa inaad gaarto go'aano dhib ah tijaabada cudur-aqoonsiga ka dib, kaasina waa waa wax loo baahan yahay inaad sii fiican u ogaato ka hor inti lagu baarin.

Xasuuso in markii ay tirada hooseyso uu fursadda sii sareeyo. Sidaas awgeed, tijaabo ahaan, 1kiiba 80 waa fursad ka sarreeya 1kiiba 400.

Inta u dhexeeyo 3% iyo 5% ee haween (oo ah wax u dhexeyo seddax iyo shan 100 kiiba) ee lagu sameeyo tijaabada dhiigga waxay helaan natiijo muujinaaya inay qabaan fursad sare inay dhalaan ilmo qaba xaaladda Down.

Natiijoyinka tijaabada dhiigga ee laga baxsho NHS'ta Wales waa la kormeera.

Dhowr haweeno kiliiniko khaas ah ayeey ula tegaan tijaabada baarista xaaladda Down. Baaritaanyada ay sameeyaan kiliinikyada khaaska ah ma kormeero NHS. Kani waxaa loola jeedaa in umulisadaada aysan ku siin karin macluumaad ku saabsan tayada iyo saxnaanta baaritaanyada laga sameeyo kiliinikyada khaaska ah. Sida baaritaanka uu NHS sameeyo, baaritaanka ay kiliinikyada khaaska ah sameeyeen kuma sheegi karo haddii cunugga qabo xaaladda Down.

Tijaabada cudur-aqoonsiga xaaladda Down

Waa maxay tijaabada cudur-aqoonsiga?

Haddii aad qabtid fursad sare inaad dhasho cunug leh xaaladda Down, waxaa lagu siin doonaa tijaabada cudur-aqoonsiga.

Buug-yarahaan wuxuu ku siinaaya macluumaad aasaas ah ee ku saabsan baaritaanyada cudur-aqoonsiga lagugu sameyn karo ka dib markii lagugu sameeyo tijaabada dhiigga.

Waa maxay amniocentesis?

Amniocentesis waa habsocod ee lagu baxsho 15 ilaa 20 mililiitar (waa seddax ama afar qaado shaahi) ee dareerka ku heeraran ilmaha uurka ku jiro (kani waa dhacaanka ilmo-galeenka). Unugyada cunuggaada waxay ku jiraan dareerahaan, waxaana lagu baari karaa shaybaar si loo eego koromosoomka cunugga.

Information for Women
© Public Health Wales

Waxaa la sameyn karaa markii aad gaarto 15 toddobaad ee uur ah.

Amniocentesis wuxuu leeyahay halisyo. 100kiiba hal haween ee uur leh wuxuu ku sababa ilmo-dhicis (1%).

Maxuu ii sheegi doonaa tijaabada cudur-aqoonsiga?

Natiijada wuxuu kuu sheegi doonaa haddii ilmahaada qabo xaaladda Down. Haddii uu ilmaha qabo xaaladda Down, waxaad go'aansan kartaa haddii aad rabtid inaad isku diyaariso dhalashada cunug qaba xaalad Down ama joojiso uurka.

Baaritaanka koromosoomka waxaa lagu ogaan karaa xaalado koromosoom kale ee aan caadi eheen iyo xaaladda Down iyo haddii lagugu sameeyo baaritaanka amniocentesis, kani waa laguu macneyn doonaa.

Macluumaad dheeraad ah

Waxaad macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xaaladda Down ka heli kartaa umulisadaada, takhtarka isbitaalkaaga, ama www.antenatalscreening.org

Natiijoyinka Dhalidda Ka Hor Iyo Xulashooyinka (ARC)

73 Charlotte Street
London
W1T 4PN
Khadka caawinta: 020 7631 0285
E-mail: info@arc-uk.org
Bogga internetka: www.arc-uk.org

Ururyada Xaaladda Down (DSA)

Langdon Down Centre
2a Langdon Park
Teddington
TW11 9PS
Telefoonka: 0845 230 0372
Fakis: 0845 230 0373
E-mail: info@downs-syndrome.org.uk
Bogga internetka: www.downs-syndrome.org.uk

© Xuquuqda Daabacadda 2010. Ururka NHS ee Caafimaadka Shacbiga Wales. Dhammaan xuquuqyada u xiran. Lama ogola in gebi ahaan ama qayb ahaan nuqul laga sameysto ayadoo fasax laga helin milkiilaha xuquuqda daabacadda.
www.antenatalscreening.org
Abriil 2010
DS Daabacadda 9aad

Information for Women
© Public Health Wales